# DASTUURKA DEGMADA GURIGA SARE 62 EE XISBIGA DEMOCRATIC-FARMER-LABOR

Magaca ururkan ayaa ah Degmada Guriga Sare 62 Democratic-Farmer-Labor Party (waa "Laanta").

**Qaybta 1aad.** Laanta waxaa lagu maamulaa Dastuurka Gobolka ee DFL iyo Sharci Hooseedka, markii laga reebo sida lagu qeexey dukumeentigan.[1]

**Qaybta 2aad.** Dastuurkan wuxuu hoos yimaadaa qaybaha khuseeyo ee is subordinate to the pertinent parts of the Dastuurka Gobolka ee DFL iyo Sharci Hooseedka iyo Baaqa Rasmiga ee Gobolka ee DFL. Arrimaha barlamaanka oon lagu maamulin Dastuurkan iyoi Sharci hooseedkiisa, ama sharciyada qaybta laga hadlaayo, ama Dastuurka Gobolka ee DFL iyo Sharci Hooseedka, ama lagu maamulin Baaqa Rasmiga ee Gobolka ee DFL, waxaa lagu maamuli doonaa Robert's Rules of Order, newly revised (Sharciyada Maamulka ee Robert, ee Goor Dhaw la Cusbooneysiiyay).

**Qaybta 3aad.** Dastuurkan waxaa lagu beddeli doonaa qodobadiisa codaynta aqlabiyadda ergada ee Shirweynaha laanta waxayna ka sare mari doontaa dhammaan Dastuuryada hore iyo Sharci hooseedka of laanta. Isbeddelaadka dhaco ayaa lagu dhaqmi doonaa markii lasoo afjaro Shirweynaha ee lagu hirgeliyay. Koobi oo Dastuurkan iyo isbeddelada ku yimaadeen ayaa lagu kaydin doonaa Xafiiska Xisbiga DFL ee Gobolka.

**Qaybta 4aad.** Laanta ayaa hirgelin kartaa sharci hooseedka la xiriiro arrimo si toos ah ay u maamulin ama aan khilaafsanayn Dastuurka Gobolka ee DFL iyo Sharci Hooseedka iyo Dastuurkan. Sharci hooseedka ayaa lagu hirgelin karaa ama lagu beddeli karaa codayn aqlabiyad ee ka dhacda shirweynaha laanta ama codayn ansixin ee boqolkiiba 60 ee lagu qabtay shirka guddiga dhexe ee Laanta. Koobiga isbeddelaadka lagusoo jeedinaayo sharci hooseedka waa laasim in laga qayb yeelo ogeysiinta shirka guddiga dhexe.

**Qaybta 5aad.** Laanta ayaa ku qaban doontaa shir ganacsiyeed sanadka tirada isdhaafka leh sida lagu qeexey Dastuurka Gobolka ee DFL iyo Sharci hooseedka.

---

## SHARCI HOOSEEDKA

A. Khasnajiga, isagoo ka amar qaadanaayo Guddoomiyaha ayaa samayn karaa lacag bixin iyo dib u siinta lacagta oo ilaa $150.00 calaa hawsha Degmada Guriga Sare. Dhammaan lacag bixinta iyo dib u siinta lacagta ee ka badan $150.00 calaa hawsha Degmada Guriga Sare waxaa loga baahan yahay ogolaanshaha Guddiga Dhexe ama Guddiga Maamulka Sare. Iyadoo keli khuseyso ula jeedada ansixinta lacag bixinta iyo dib u siinta lacagta, Guddiga Maamulka Sare ayaa ku codayn karaan telefoonka ama iimaylka.

B. Mid walba oo Agaasimeyaalka ka mid ayaa si guud loo dooran doonaa. Gudoomiyaha ayaa, iyadoo ku xiran ogolaanshaha Guddiga Maamulka Sare, laakin ku qasbanayn, u magacaabi karaa hal ama ka badan boosaskan xiga:

<u>Isgaarsiinta</u>: Agaasimahan ayaa isu dubo ridi doono dhammaan hawlaha isgaarsiinta la xiriira ee Degmada Guriga Sare. Agaasimahan wuxuu ka caawin doonaa ilaalinta hawl qabadka bogga internetka Degmada Guriga Sare iyo/ama ka muuqashadeeda baraha bulshadda (tusaale, bogga Facebook, akoonka Twitter) isagoo la shaqaynaayo Gudoomiyaha.

<u>Lacag uruurinta</u>: Agaasimahan ayaa isu dubo ridi doono dhammaan hawsha lacag uruurinta ee Degmada Guriga Sare. Agaasimahan wuxuu ka shaqayn doonaa booska gudoomiyaha guddiga taagan ee Lacag Uruurinta.

<u>GOTV</u>: Agaasimahan ayaa isu dubo ridi doono dadaalada helitaanka codadka ee Degmada Guriga Sare. Agaasimahan wuxuu ka shaqayn doonaa booska gudoomiyaha guddiga joogtada ee GOTV.

Dhammaan agaasimeyaalka ayaa qaban doonaan hawlaha Degmada Guriga Sare sida uu ugu qoondeeyo Guddoomiyaha ama Guddiga Maamulka Sare. Shirweyne walba ka dib, guddiga magacaabinta ayaa u gudbin doono Gudoomiyaha cusub ee lasoo doortay talo bixintooda, hadday jirto, ee magacaabinta dadka boosaskan buuxiyo.

C. Degmada Guriga Sare ayaa lahaan doontaa Guddiyadan Joogtada xiga:

<u>Lacag Uruurinta</u>: Guddigan wuxuu ka kormeeri doonaa dhammaan arrimaha lacageed ee Degmada Guriga Sare ay ku jiraan dejinta miisaaniyadda iyo lacag uruurinta. Hadduu Guddoomiyaha uu ugu magacaabay Agaasime booska Agaasimaha Lacag Uruurinta, qofkaasi ayaa hogaamin doono Guddigan. Khasnajiga iyo Khasnaji ku Xigeenka ayaa ku jiri doono Guddigan.

<u>GOTV</u>: Guddigan wuxuu fududeyn doonaa hawlaha GOTV ee Degmada Guriga Sare iyo isu xiri doonto musharixiinta iyo ololaha isu duwan ee DFL ee Gobolka. Agaasimaha GOTV ayaa hogaamin doono Guddigan.

<u>Wacyi gelinta</u>: Guddigan wuxuu ka shaqayn doonaa kordhinta kala duwanaanshaha kuwa qaybta ka ah hawlaha Degmada Guriga Sare. Intaasi waxaa dheer, Guddigan wuxuu qorsheyn doonaa oo na dhaqan gelin doonaa hawlaha bulshadda ku salaysan (oon ahayn kuwa lacag uruurinta) sifo oo si wacan logu xiriiriyo Degmada Guriga Sare bulshadda, iyadoo ku jirto laakin aan ku koobnayn madalada arrimaha ku salaysan. Saraakiilka Wacyigelinta ayaa hogaamin doono Guddigan.

---

[1] The Dastuurka Gobolka ee DFL iyo Sharci Hooseedka iyo Baaqa Rasmiga waxaa laga heli karaa: https://www.dfl.org/partydocuments/. Haddii koobiyo warqad loo baahan yahay, fadlan daabaco koobiyo ama ka la xiriir Xisbiga Gobolka ee DFL lambarkan 651-293-1200 ama 1-800-999-7457.

Waxaa Ansixiyay Degmada Guriga Sare 62 taarikhda _____, 202___ .

D. Maqnaanshaha sababta leh ayaa loo ogolaan doonaa sababta macquulka ah iyadoo la ogeysiiyay Guddoomiyaha ama Xog Hayaha shirka ka hor. Maqnaanshaha la cafiyay ayaa sidoo kale la ogolaan doono, hadday dhacdo xaalad degdeg, oo na lagu sameeyo ogeysiin macquul ah.